

## **XUKUUMADDA SOOMAALIYA**

**Xeerka Maamulka 15 Maarso 1957, lamba. 64 rep**

**Guddiga loo xilsaaray in ay ka soo shaqeeyaan Xeerka Ciqaabta Ciidamada Soomaaliya.**

### **MAAMULAHA**

Marka uu arkay Xeerka 27 Disembar lamba. 19, ee Xukuumadda Soomaaliya u wakiishay in ay soo saaraan Xeerka Ciqaabta Ciidamada Soomaaliya;

Marka uu garowsaday baahida loo qabo in la magacaabo Guddiga soo darsa kana soo shaqeeya mashruuca ku saabsan Xeerka la soo sheegay;

Marka uu dhagaystay Golaha Wasiirada;

### **WUXUU DEKEREETO KU SOO SAARAYAA**

#### **Qod. 1**

Waxaa la dhisay Guddii soo darsa soona diyaariya Xeerka Habka Madanig Soomaaliya oo ka kooban:

Guddoomiye: Wasiirka Arrimaha Arrimaha Maaliyadda Salaad Cabdi Maxamuud

Xubin: Xildhibaan Sh. Maxamed Maxamuud Faqi

“ Xildhibaan Maxamed Cumar Cabdi

“ Xildhibaan Khaliif Yuusuf Boqor

“ Xildhibaan Glorio Col. Camillo

“ Xildhibaan Nuur Maxamed Cabdow

“ Xildhibaan Axmed Maxamed Maxamuud

“ Xildhibaan Xaaji Cabdi Jaamac Cabdulle

“ Khabiir Rizzetto Dr. Fulvio

“ Khabiir Arnero Col. Alfredo

“ Khabiir Xaaji Cusmaan Maxamed

“ Khabiir Ten Maxamed Siyaad

“ Qaalli Sh. Maxamed Cali Yare

“ Xoghaye: Tucci Dr. Mario

#### **Qod. 2**

Guddigaan sharciyan waxaa xubin ka noqonaya Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ama garsoore uu isagu soo magacaabo.

#### **Qod. 3**

Guddiga saldhigiisu wuxuu noqonayaa Garyaqaanka Guud kaasoo loo xilsaaray in uu hawlaha guddiyada kale.

#### **Qod. 4**

Qoraal doodeedka (maxdarka) waxaa fadhi kasta ka samaynaya xoghayaha kaaso lagu soo darayo warbixinta kama dambaysta ah.

## **Qod. 5**

Xubnaha guddiga waxaa u sugnaatay dhaqaale ay ku qaadanayaan ka soo qaybgalka fadhiyada sida ku cad qod. 2 ee Dekereetada 10 Setembar 1956, lamba. 94

Kharashka arrinta la xariira wuxuu saaranyahay Cutubka 76 – ee hawlgal miisaaniyadeedka.

Muqdisho, 15 Maarso 1957.

Maamulaha

**P. Franco**

## **Cabdullaahi Ciise Maxamuud**

Waa la Hubiyay lana Diiwaangaliyay – Diw. Lamba. 2, bogga lamba. 113.

Muqdisho, 30 Maarso 1957.

Hantidhowraha Guud: **Spadaro**